

Waa maxay P-EBT

Marka la soo gaabiyo waa [Wareejinta Manfaca Elegtarooniga ee Safmarka](#), barnaamijka P-EBT ga waa barnaamij gargaar COVID-19 ah oo dowladda federaalka ay bixiso oo lagu bixiyo [Xeerka Kajawaabista Fayraska ee Mudnaanta Qoyska \(Families First\)](#) iyo [Xeerka Qorshaha Samatabbixinta Mareykanka ee 2021](#). Isticmaalka kaararka P-EBT ga barnaamijku waxa uu bixinayaa gargaar Barnaamijka Qadada Dugsiga Qaranka iyo qoysaska u qalma si ay u beddelaan cuntooyinka dugsiga ee ay seegeen dhacdooyinka COVID-19 la xiriiray darteed.

Wuxuu la mid yahay [Barnaamijka Gargaarka ee Kabka Nafaqada \(SNAP\)](#) EBT ama kaarka deynta (debit card), kaararka P-EBT waxaa lagu iibsaa karaa [cunto](#) waxaa wax looga soo iibsaa karaa [dukaamada raashinka, tafaariqda ee la oggolaaday](#) iyo [dukaamada oonlaaynka](#) ee SNAP qaata. Waalidiinta iyo daryeelayaashu waa inay haystaan kaarkooda P-EBT ga si loogu isticmaalo ilaa barnaamijka P-EBT laga joojinayo.

Hawlgelinta barnaamijka waxaa lagu ansixiyaa qaab gobol-gobol ku salaysan, ee wakhtiga loo qatay barnaamijka. Gobolkan Tennessee, Waaxda Adeegga Aadanaha (TDHS), iyada oo kaashanaysa [Waaxda Waxbarashada ee Tennessee \(TDOE\)](#), Waxay ku shaqeysaa P-EBT ga sida uu qabo ansaxinta dowladda federaalka, habraaca iyo waqtiyada ay u qabatay.

---

Yaa P-EBT Ka Heli kara Gobolka Tennessee?

**U-qalmitaanka P-EBT ga waxay ku xiran tahay laba qodob oo aasaasiga ah:**

1. Imaha u qalma in iskuulka ay helaan cuntada bilaashka ah ama qiimaha jaban ee dugsiga laga bixiyo [Barnaamijka Qadada Dugsiga Qaranka](#). Tan waxaa ku jira arday kasta oo dhigata oo dugsiga ka hela cunto bilaash ah ee dhammaan ardayda (sida hoos timaada xeerka gaar ah oo loo yaqaan "[Bixinta U-qalmitaanka Bulshada](#), Bixinta 2 iyo 3 dugsiyada").
2. Haddii ilmahaaga uu seegay inuu helo cunnooyin bilaash ah ama cuntada qiimaha jaban ee iskuulka laga bixiyo oo ay sababtuna tahay iskuulka oo xirnaa darteed oona horey loo tagi jiray awgeed; ama iskuulka tago wakhti cayiman ama saacaddo cayiman ugu yaraan 5 maalmood oo isku xigta sannad dugsiyeedka hadda socda.

**Yaa go'aaminaya haddii Ilaha/Arday uu u Qalmo Barnaamijka P-EBT ga iyo in Kale?**

Dugsi kasta oo Tennessee ku yaala/degmo dugsiyeed kasta waxay TDHS iyo TDOE siisaa macluumaad ku saabsan ardayda u-qalma inay helaan P-EBT. Haddii adigu aadan hubin haddii ilmahaagu uu helayay cunnooyin bilaash ah ama qiimo jaban iskuulka laga siinayay, ama haddii ilmahaagu dhigto iskuulka Bixinta U-Qalmitaanka Bulshada, Bixinta 2 ama 3, kala xiriir dugsigaaga wixii faahfaahin ah.

---

U-qalmitaanka P-EBT ee Mustaqbalka, Wakhtiga Xaadirka ah iyo Horeyba ee Tennessee

Tan iyo markii la bilaabay ee sannadka 2020, "wareeyo" badan oo P-EBT ga ah ayaa taageeray dadka reer Tennesseans ee u baahan. Muddo ka dib, u-qalmitaanka wareeg kasta oo P-EBT ga ah ayaa la sii wanaajiyay si ay si wanaagsan u buuxiso ama u xaqabtirto caqabadaha qoysaska uu saameeyay

<https://www.tn.gov/humanservices/p-ebt.html> Qaybta 1

masiibada. Si kastaba ha noqotee, waalidiinta iyo daryeelayaasha waa inay haystaan kaararkooda P-EBT ga si ay ugu isticmaalaan wareegyada mustaqbalka ee P-EBT ga ee loogu soo shubi doono.

**Dib u eeg xogta hoose ku qoran ee ku saabsan wareegyada soo socda, hadda iyo kuwii hore ee P-EBT ga.**